



*The Transitional Federal Government of the Somali Republic*  
Office of the Prime Minister

Ref: XRW/LT/00.435/08/12

Date 15.08.2012

Ra'iisul Wasaaraha Xukumadda Federaalka Soomaaliya:

**Markuu arkay:** Qodobka 3aad ee Axdiga/KMG ee Dowladda Soomaliya,  
Farqadiisa 1aad & 2aad

**Markuu arkay:** Qodobka 46aad, Farqadiisa 1aad & 2aad iyo Qodobka 48aad, Farqadiisa  
1aad- xarafka (A&B) oo qeexaya (Wajibaadka Wasiirka 1aad)

**Markuu arkay:** Qodobka 52aad Farqadiisa 1aad & 2aad oo qeexaya (waajibaadka Golaha  
Wasiirada)

**Markuu arkay:** Qodobka 53aad Farqadiisa 3aad, Xarafka (a iyo b) oo qeexaya  
(Xilka Golaha Wasiirada):  
a) - Fulinta Awooda Golaha wasiirada iyo meelmarinta waajibaadkooda.  
b) - Maareynta iyo dhaqangelinta shuruucda loo xilsaaray

**Markuu arkay:** Qodobka 44aad ee Axdiga KMG ee qeexaya (waajibaadka Madaxweynaha)

**Markuu arkay:** Qodobada 81, 83, 85 ee Dastuurkii 1960-kii oo qeexaya waajibaadka  
Golaha wasiirada

**Markuu ogaaday:** Wareegtooyin ka soo baxay xafiiska Madaxweynaha JS oo aan  
ku salaysnayn go'aan golaha wasiirada sifo sharciga waafaqsan

**Markuu arkay:** Go'aankii kalfadhiga Golaha wasiirada oo ku taariikhaysan  
13kii, August, 2012 oo lagaga dooday Habsami usocodka Hawlaha  
Qaranka oo ku dhisan nidaam dawli ah oo sharciyaysan

Haddaba, Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, isagoo tixraacaya qodobada kor kuxusan iyo Go'aankii Golaha wasiirada ee 13kii, August, 2012, wuxuu halkan ku caddaynayaa in wareegtooyinka ka soo baxay xafiiska Madaxweynaha ee ku saabsan magacaabidda Gobolo iyo Degmooyin cusub, dalacsiin Sarakiil Dawladeed iyo wixii lamid ah ee aan soo marin habka sharciga qeexayo in ay sharciga dawlaha-ah ka hor imaanayaan lana dhaqangalin Karin sida kucad Qodobka 3aad ee axdiga (Sarraynta Sharciga) Farqadiisa 2aad oo qeexaya " Sharci kasta oo aan la soo marin ama ka hor imanaya Axdiga Dowladda wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan.

**MUQDISHO** 15/08/2012

  
**Mudane Cabdiweli Maxamed Cali**  
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaaliga Soomaaliya

